



## **Kaadhka *I Speak*** (Sharaxaad Waalid)

Ujeedada kaarka ***I Speak*** waa inuu kaa caawiyoo inaad hesho turjumaan tababaran si aad u hesho gargaar degdeg ah. Waxay aqoonsanaysaa afkaaga hooyo waxayna ogeysiinaysaa dugsiga in loo baahan yahay turjumaan. Waxa kale oo ay sharraxaysaa sida dugsigu u heli karo adeegyada turjubaanka. Degmadu waxay ku siin doontaa kaadhka ***I Speak*** wakhtiga isdiiwaangelinta ama waxay si fudud u waydiin doontaa shaqaalaha dugsiga inay ku siiyaan mid.

Markaad si shakhsi ah u booqanayso dugsiga ilmahaaga ama markaad soo wacayso, shaqaalaha dugsigu waxay odhan karaan “Sug taageerada luqadda” Ingiriisi. Tani waxay tusinaysaa in dugsigu fahmay baahida caawimada luqadda, oo uu ka shaqaynayo sidii uu ku caawin lahaa turjumaan shahaado haysta.